

SHURUUDAHA: BAARALIIGALADA BARNAAMIJKA KORMEERKA CIIDAMADA AMNIGA

Legal Action Worldwide

LAW waa shabakad nooc gaar ah oo aan faa'iido-doon ahayn iyo think tanka garyaqaanada xuquuqda aadanaha oo gargaar sharciyeed hal abuur ah siiya shakhsiyaadka iyo bulshooyinka ku soo rafaaday xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo sidoo kale xadgudubyada meelaha nugul iyo kuwa ay colaaddu saameysay. Waxaanu diiradda saarnaa xadgudubyada galmada iyo barokicinta khasabka ah. LAW waxay ka shaqeysaa Afrika, Koonfur Bari Asiya iyo Bariga Dhexe. Barnaamijkayaga ugu wayni wuxuu ka socdaa Soomaaliya.

LAW waxay hadda raadinaysaa baaraliigalo deggan Muqdisho ama nawaaxigeeda oo gargaar sharci iyo mid caawimaadba siiya DGkB iyo dadka lagu xidhxidhay xeryaha DGkB ee Rajo Wanag iyo Midnimo iyo Saldhigyada booliiska ee Dharkenley iyo Deyniile. Baaraliigaladu waxay heli doonaan lacag gunno bille ah iyo tababaro xiliyo. Baaraliigalada ka socda ururada Shabakadda Gargaarka Sharci ee Soomaaliyeed ayaa si gaar ah loogu dhiirigelinayaa in ay soo dalbadaan.

Macluumaadkii Hore

LAW waxay taageeraysaa lix baaraliigal si ay ugu qabtaan gaadhsiin sharci labada xero ee DGkB, lagana bilaabo xeryaha DGkB ee Rajo Wanag iyo Midnimo. Waxa jiri doonta in diiradda la saaro siinta caawimaad sharci dadka ka badbaaday Xadgudubyada ku Salaysan Jinsiga (XkSJ).

Baaraliigaladu waxay si dhow ula shaqeyn doonaan Guddiga Kormeerka Rayidka (GKR) oo hadda kormeera booliiska ka shaqeeya labada xero. GKR wuxuu ka koobanyahay bixiyeyaasha gargaar sharci, wakiilo ka socda bulshada rayidka ah, saraakiil booliis iyo odayaal. Waxa la aasaasay October 2017, ulajeedkuna yahay in la sameeyo kormeer korna loo qaado la xisaabtanka Booliiska Soomaaliya. GKR wuxuu booqdaa saldhigyada booliiska ee Dharkenley iyo Deyniile si todobaadle ah waxayna leeyihiin shirar bille ah.

Baaraliigalada waxa lagu taageerayaa si ay booqdaan saldhigyada booliiska, oo ay qabtaan gaadhsiin, sidoo kalena ay ka-badbaadayaasha XkSJ u raacaan booliiska. Waxay dib ugu soo warbixinayaan GKR haddii ay jiraan dhacdooyin dhibaateyn ama anshax xumo ah.

Waajibaadka

- Bixinta gargaar sharci oo bilaash ah iyo caawimaadda DGkB ee xeryaha Rajo Wanag iyo Midnimo, iyadoo diiradda la saarayo gargaarista ka-badbaadayaasha XkSJ.
- Ka qayb qaadashada booqashooyinka ay GKR ku tagaan xarumaha booliiska ee Dharkenley iyo Deyniile iyo siinta gargaar sharci oo bilaash dadka xidhan.
- Qorista warbixino labadii todobaadba hal mar oo faahfaahinaya tirada macmiisha loo adeegay iyo dabecadda iyo nooca caawimaad sharci ee la siiyay.
- Ka qaybgalka shirarka billaha ah ee GKR si aad u naaqishtaan una gudbisaan kiisaska, sidoo kalena dabagal ku samaysaan wixii kiisas xadgudub galmo ah ee la aqoonsaday.

Xirfadaha iyo Khibradda loo Baahanyahay

Khibradda

- Waayo-aragnimadda ku shaqaynta baaraliigalnimo.
- Khibrad u leh la shaqaynta bulshooyinka nugal, oo ay ka mid yihiin DGkB, dadka xidhan, dadka ka badbaaday XkSJ ama caruurta.
- Khibrad hore oo ah la shaqaynta booliiska iyo / ama xidhiidh fiican oo lala leeyahay saldhigyada booliiska ee ku hawlan mashruucani waa baro dheeri ah.
- Waayo-aragnimo la shaqaynta dadka ka-badbaaday XkSJ waa baro dheeri ah.
- Aqoonta iyo khibradda sharciga dembiyada, habraaca, iyo / ama sharciga xuquuqda aadanahu waa baro dheeri ah.

Xirfado

- Xirfadaha xidhiidhka iyo dad ladhaqanka oo aad u fiican. Baaraliigalada la doorto waa in ay si caadi ah uga hadli karaan shirarka GKR, waxaana laga filayaa in ay wax ku darsadaan.
- Xirfado abaabulisoo aad u fiican.
- Awood u leh in uu curiyo ku shaqeeyana kormeer dhow.

Shuruudaha Luqadda

- Aad ugu fiican qorista, ku hadalka iyo dhegaysiga af Soomaaliga.
- Ku fiican qorista, ku hadalka iyo dhegaysiga af Ingiriisiga, oo ay ka mid tahay awoodidda ku qorista warbixinada aasaasiga ah af Ingiriisi.

SIDA LOO XAREEYO ARAAJIDA

Waa in araaajida lasoo gudbiyaa ugu dambeyn 31 January 2018

Taariikhda ay bilaabaneyso: February 2018

Sida loo xareesto araaajida:

Fadlan CV-gaada iyo warqad aad ku qeexeso in aad daneyneyso oo English ah kusoo dir emailka carthy@legalactionworldwide.org ka hor 31 January 2015

Ciwaanka emailkana kadhig: **‘Paralegal application’**

- kaliya cida kusoo qeybaha hore ayaa lala soo xiriiri doonaa si wareysi looga qaado
- LAW waxay aaminsantahay sinaanta fursadaha shaqaalaha. Shaqadaan waxaa aad loogu dhiiri galinayaa in ay haweenka soo apply greeyaan.